SOMALI

Hubinta Tayada Xannaano Maalmeedka Qoyska

Family Day Care Quality Assurance

Handbook

Buugga Gacan qabsiga ah

Second Edition 2004

National Childcare Accreditation Council

© Australia Government 2001

ISBN 0-9570664-4-7

Shaqadani waa xafidan tahay.Ka sokow isticmaalka la ogol yahay Sharciga Xuquuqda Daabacaada 1968, iyo/ama qasadka uu maagan yahay daabacahu, qayb ka mid ah lama soo saari karo wax kastoo la adeegsado iyadoon laga helin ogolaansho qoraal ah oo laga helayo Golaha Aqoonsiga Xannaanada Carruurta ee Qaranka.

Waxaa sameeyey National Childcare Accreditation Council Inc.

Waxaa daabacay National Childcare Accreditation Council Inc., Level 3, 418a Elizabeth Street, Surry Hills NSW 2010, Australia (www.ncac.gov.au).

Horudhac

Hubinta Tayada Xannaano Maalmeedka Qoyska (FDCQA) waxay ujeedadeedu tahay inay siiso carruurta ku jirta xannaano maalmeedka qoyska ee Australia oo dhan xannaano tayo sare leh oo sida ugu wanaagsan u horumarisa waxbarashadooda iyo koritaankooda sanadaha muhiimka ah ee ugu horeeya. Ujeedada ugu balaaran ee FDCQA waxaa weeye inay xubiso in carruurta ku jirta xannaano maalmeedku helaan khibrado wanaagsan iyo isdhexgal kicinaya oo ka taxadaraya dhammaan dhinacyada koritaankooda oo dhan. Sidan ayey sameysaa iyadoo la qeexayo xannaano maalmeedka qoyska ee tayada leh iyo siinta hab lagu cabiro xannaanada tayada leh ee uu bixiyo qorshuhu iyo in la ogaado asalada u baahan hagaajin tayo joogta ah.

FDCQA waa bilow ku xiran Lacagta Xannaanada Carruurta ee Dawlada Awstareeliya iyo ogolaanshaha caawimo hawleed (Child Care Benefit and Operational Assistance) loogu talagalay qorshayaasha xannaano maalmeedka qoyska1. Ilaa intii la sameeyey 1-dii Luulyo 2001, FDCQA waxaa maamulayey Golaha Aqoonsiga Xannaanada Carruurta ee Qaranka (NCAC).

Iyadoo ay jiraan nidaamyo aqoonsi oo iskaa ah oo loogu talagalay adeegyada carruurta ee dalalka kale, FDCQA Australia waa mid keli ku ah heerka caalamiga ah maadaama ay tahay barnaamijkii ugu horeeyey ee hubinta tayada ee adeegyada xannaano maalmeedka qoyska ee aduunka ee lagu xirayo maalgelinta xannaanada carruurta iyadoo loo marayo sharci oo ay maalgelineyso taageereysana Dawlada Dhexe[2]. Nidaam Aqoonsi iyo Hagaajin Tayo guul leh oo ka shaqeeya xarumaha xannaano maalmeedka dheer ee Australia iyo bilowga FDCQA ee Xannaano maalmeedka qoyska waxayna ufidineysaa macluumaadka la hayo qoysaska isla marka ay doorasho xannaano ah u sameeyaan carruurtooda.

FDCQA waxay ku saleysan tahay waxa hadda loo yaqaan ee kusaabsan xannaanada carruurta tayada leh ee labadaba khibrad iyo cilmi baarisba, iyo sidoo kale laga helay wadahadal aad u balaaran oo lala yeeshay xannaano maalmeedka qoyska iyo mihnadaha kale ee carruurtinimada hore. Tusaha Xirfad ku shaqeynta FDCQA (2001) *(Quality Practices Guide)* wuxuu dulmar ku sameynayaa 30 Xeer ee Xannaanada Tayada iyo 6-da Asal Tayo . Waxaa sidoo ka mid ah fikradaha muhiimka ah iyo tayo tilmaamayaasha loogu talagalay inay hagaan qorshayaasha mihnada xannaano maalmeedka qoyska.

---

1 Ujeedooyinka FDCQA, erayga ah "qorshe" waxaa ku jira xannaaneeyayaasha, unuga iskuduwida maamulka iyo shaqaalaha.

2 Hubinta Tayada Xannaanada Saacadaha Wakhtiga Dugsiga ka baxsan (OSHCQA) ee adeegyada Xannaanada saacadaha wakhtiga dugsiga ka baxsan iyo Habka Aqoonsiga iyo Hagaajinta Tayada (QIAS) ee xarumaha Xannaanada maalinta oo dhan

Waa maxay Xannaanda Carruurta ee Tayada leh?

Adeegyada xannaanda carruurta tayada leh waxay bixiyaan wax ka badan *xannaano* carruureed keliya – xannaano maalmeedka qoyska ee tayadaleh waxay dhiirigelineysaa horumarinta xiriirka wanaagsan oo ka dhaxeeya xannaaneeyayaasha iyo carruurta iyo qoysaskooda. Waxay siisaa carruurta khibrado balaarinaya fekerkooda iyo afkooda oo ku caawinaya barashada iyo koritaanka.

Qorshaha (scheme) xannaano maalmeedka qoys ee tayada wanaagsan:

- Waa mida leh ujeedooyin iyo falsafado cad oo ay ku heshiiyaan xannaaneeyayaasha, shaqaalaha, maamulka iyo qoysaska, oo haga dhammaan waxyaalaha ay qaybato xaruntu.
- Waa mida ku faraxda xushmeysa oo daryeesha shakhsinimada iyo iskutiirsanaanta ee dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan carruurta ka soo jeeda asalo kala duwan iyo kuwa leh baahiyaha dheeraadka ah.
- Waa mid tixgelisa ku haboonaanshaha dhammaan waxyaalaha soo mara iyo waxqabadka waxyeelaya carruurta marka loo eego koritaankooda.
- Waa mida dhiiri gelisa qoysasku inay noqdaan kuwo ku lug leh qorshaha korisana xiriirka ka dhexeeya xannaaneeyayaasha, shaqaalaha iyo qoysaska si ay isugu taageeraan heerarkooda isdhameystiraya.

Xannaanada tayada leh waxay soo jiidaneysaa aasaas wanaagsan oo aqooneed oo ku saabsan carruurnimada hore, oo ay ku jirto sida ay carruurtu wax u bartaan una koraan. Shaqaalaha xarunta xannaanada carruurta bixinta ay bixinayso xannaanada ugu fiican waxay ogaanayaan waxa ay yihiin khibradaha haboon iyo waxyaalaha laga rajeynayo carruurta da'aha kala duwan ee ku haboon oo noqonaya mid xasaasi ku ah qofka iyo jihooyinka dhaqanka ee koritaan. Shaqaalahani waxay sidoo kale ogaanayaan sidii ay u siin lahaayeen degaan kaas leh khibrado madaxbanaan oo la qorsheeyey kicinayana, oo ku haboon ilmo kasta wuxuu shakhsiyad ahaantiisu xiiseeynayo iyo baahidiisa.

Horumarinta tayadu waa nidaam wada shaqeyn leh oo kulug leh kuwa xiisaha ugu badan u haya tayada xannaanada. FDCQA waxay dhiiri gelineysaa xarun kasta iyo qoysaskeedu inay ka wada shaqeeyaan doorarkooda isdhameystiraya si ay u qeexaan falsafada iyo ujeedooyinka ay ku hagi lahaayeen khibrado ku haboon, nidaamka isdhexgalka iyo dhammaan waxqabadka kale ee qorshaha.

Dhammaan qorshayaasha xannaanada maalinta oo dhan ee ka diwaan gashan NCAC inay ka soo qayb galaan FDCQA waxaa laga doonayaa inay dhaqan geliyaan nidaamyo habeysan oo ay ku sii wadaan hagaajinta tayada. Halkaas oo qorshe walba laga yaabo inuu goosto sida ugu wanaagsan ee loo gaari karo tan, NCAC waxay dooneysaa inay qorshayaashu muujiyaan in:

(a) ay leeyihiin nidaam socda oo lagu hagaajinayo tayada; iyo

(b) nidaamyadan waxaa lagu wargelinayaa isqiimeyn joogta ah oo laysku qiimeynayo heerarka ku qoran *FDCQA Quality Practices Guide* (2004).

Waa maxay sababta ay tayadu muhiimka ugu tahay Xannaanada Carruurta

Sanadihii dhawaa, tirada carruurta ah laga bilaabo marka ay dhashaan ilaa da'da dugsiga hoose dhexe ee lagu xannaaneeyo gurigooda debadiisa si aad ah ayay u korartay iyadoo la koreysa tirada qoysaska ay labada waalidba shaqeynayaan ama, xaalada waalidka kelida, ee shaqeeya. Baahiyaha kala duwan iyo isbedelka qoysaska Australia ah ee ay ku jirto xannaanada shaqada la xiriirta iyo ta aan la xiriirin waxay ka muuqataa kororka rabitaanka adeegyada xannaanada carruurta. Wakhtiga celceliska ah ee ilmaha shakhsiga ahi ku kharashgareeyo xannaanada si aad ah ayey u korortay. Carruurta yar yari waxay ku kharashgareyn karaan 12,500 saacaadood xannanada carruurta ka hor inta aysan bilaabin dugsiga; taasi waxay ka yartay 500 oo saacadood inta ay ilmuha ku qaadato waxbarashada inta lagu jiro 13 sanno ee dugsiga uu dhiganayo oo dhan[3].

Tayada xannaanada ee carruurta yar yari helaan, khibradahooda waxbarasho iyo xiriirkooda gaar ahaan sanadaha yar ee ugu horeeya noloshooda, aad bay xasaasi ugu yihiin qaabeynta noloshooda. Hadda guud ahaan waa la aqbalay inaynu wax badan barano shanta sanno ee ugu horeeya nolosheena marka loo eego xili shan sanno ah oo kale oo nolosheena ah. Cilmi baaris lagu sameeyey koritaanka maskaxdu wuxuu muujiyey in khibradaha wanaagsan ee nolosha intee hore, sida kuwa lagu bixiyo xannaanada carruurta ee tayada sare leh, waxay kor u qaadaa horumarka carruurta. Adeegyada xannaanada ee tayada leh waxay ka ciyaaraan door muhiim ah kor u qaadida iyo waxyaalaha ay gaaraan carruurtu noloshooda oo dhan, oo ah xagga siinta fursado wanaagsan oo noloshooda oo dhan ah iyo natiijooyin iyo yareynta caafimaad xumada ee noloshooda danbe.

Koritaanka aqoonteena ee ku saabsan carruurta yar yar; baahiyaha kala duwan ee isbedelaya ee qoysaska Australia; tirada carruurta xannaanada ku jirta; iyo wakhtiga ay ku kharashgareeyaan xannaano ayaa muujinaya muhimada FDCQA ee xagga siinta xannaano tayo sare leh ku jirta qorshayaasha xannaano maalmeedka ee Australia oo dhan.

[3] Xannano carruureed: 50 (toddobaad) X 50 (saacadood) X 5 (sanno) = 12 500 saacadood. Dugsiga : 40 (toddobaad) X 25 (saacadood) X 13 (sanno) = 13 000 saacadood.

Meesha looga aqoonsan yahay xannaano maalmeedka qoyska inay siiso carruurta xannaano tayo sare leh, nidaamka FDCQA waxay ujeedadiisu tahay in xannaanada lagu aqoonsado nidaam aqoonsi. uJeedada ugu danbeeysa ee nidaamka FDCQA waxaa weeye inay kor u qaado oo ay u hubiso natiijooyinka tayada leh 93 450 carruurta Australia ee ku jira xannaano maalmeedka qoyska[4].

Horumarinta Hubinta Tayada Xannaano Maalmeedka Qoyska (Family Day Care Quality Assurance)

NCAC waxay masuul ka noqotay maamulka Hubinta Tayada Xannaano Maalmeedka Qoyska 1dii Luulyo 2001. Si kastaba ha ahaatee maamulka FDCQA waxay ugu sareysaa mawduuca bulshada xannano maalmeedka qoyska ee Australia ilaa iyo dhexdii 1990 nadii.

Doorashadeeda horteeda siyaasada *Qoysaska hubaasha (Certainty for Families)* ee Febaraayo 1996, dawlada Australia waxay ku dhawaaqday waxay goosatay ee ku saabsan hubinta tayada ee xannaano maalmeedka qoyska. Waxan ay goosatay, waxaa la qabtay shaqo aasaasi muhiim ah . wakhtigan intii lagu jiray, shaqo ayaa sidoo kale socotay oo la xiriirta liisan bixinta xannaano maalmeedka qoyska ee Dawladaha Gobolada iyo Territoriyada. Dhacdooyinka muhiimka ah ee horumarinta FDCQA waxaa ku jira sameynta Heerarka Qaranka ee xannaano maalmeedka qoyska ee 1997 iyo sameynta 1998 Kooxda ka Shaqeyneysa Hubinta Tayada ee Xannano Maalmeedka Qoyska, ee masuulka ka ahayd horumarinta qaabka hubinta tayada ee loogu talagalay xannaano maalmeedka qoyska.

Intii lagu jiray 2000 iyo 2001, qaab iyo wixii laysku qiimeyn lahaa oo lagu taageerayo nidaamka hubinta tayada ayaa la sameeyey, kow iyo toban qorshe oo xannaano maalmeed qoys oo Australia oo dhan ah ayaa ka mid ahaa tijaabada qalabka iyo qaabka nidaamka hubinta tayada ee la soo jeediyey. Barnaamijka tijaabada ah gobolka iyo territory kasta waa la metelayey si loo hubiyo waxyaalaha ay gaarka ku yihiin iyo kala duwanaanta xannaano maalmeedka qoyska in la matalayey.

Kulano la tashi taxane ah ee Australia oo dhan , oo ay fududeynaysay Wasaarada Dawlada Australia ee Adeegyada Bulshada iyo Qoyska ayaa dhacday maajo 2001 si ay u wargeliso qaybta xannaano maalmeedka qoyska nidaamka hubinta tayada ee la soo jeediyey iyo inay ka helaan natiijo celin nidaamkan.

Ilaa iyo intii la dhaqangeliyey FDCQA Luulyo 2001 NCAC waxay si firfircoon u dooneysay aragtiyaha bulshada Xannaano maalmeedka qoyska dhammaan waxyaalaha ku saabsan nidaamka.

Natiija celinta bulshada xannaano maalmeedka qoyska wax weyn bay ka geysteen dib u eegida habka FDCQA *Quality Practices Guide* (1 st edition, 2001)

La tashiga National Family Day Care Council of Australia (NFDCCA), NCAC waxay sameysay kooxda tixraaca ee bixiyayaasha adeega xannaana maalmeedka qoyska si ay kala shaqeeyaan shaqaalaha NCAC dib ugu noqoshada daabacaadii kowaad.

NCAC waxay jeclaan lahayd inay uga mahadceliso NFDCCA iyo kooxda tixraaca shaqadoodii ay caawimaada kaga geysteen fududeynta soo saarida FDCQA *Quality Practices Guide* (2nd edition, 2004). NCAC waxay ku kalsoon tahay in qorshayaashu ay heli doonaan horumar daabacaada labaad oo uu kaga horumarsan yahay kii ka horeeyey wuxuuna tilmaamaya horumarka lagu sameeyey sanno yar gudahood.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan horumarka FDCQA fadlan eeg Addendum ee xagga FDCQA *Quality Practices Guide* (2004)

Daabacaadaha FDCQA

FDCQA Handbook (2004) wuxuu bixinayaa dul mar guud oo ku saabsan FDCQA waana daabacaad wehel u ah *FDCQA Quality Practices Guide* (2004) iyo FDCQA Warbixinteeda Waxbarashada iskeed ah (2004) (FDCQA *Self Study Report*). Daabacaadan waxaa loo dejiyey inay hagto ka oo caawiso Qorshayaasha xagga qorshaynta hagaajinta tayada ee waxqabadyada xannaano iyo inuu fuliyo waxyaalaha laysaga rabo warbixinta ee FDCQA. Daabacaadaan soo saarideeda bilowga ah waxaa la siinayaa qorshayaasha xannaano maalmeedka qosyka ee u dinwaangashan inay ka qayb galaan FDCQA. Koobiyaal dheeraada oo ah daabacaadahan oo gadasho ah waxaa sidoo kale laga helaayaa NCAC, waxaa sidoo kale lagu si bilaash ah loogala soo bixi karaa website ka NCAC ee ah (www.ncac.gov.au).

[4] 2002 Tirakoobka Adeegyada Xannaanda Carruurta, Wasaarada Adeegyada Bulshada iyo Qoyska.

6 Asal oo Tayo iyo 30 xeer

Asalka Tayada 1: Isdhexgalka

Xeerka 1.1: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwidu waxay u. dhexgalayaan carruurta si diiran oo saaxiibtinimo iyo xushmadba leh

Xeerka 1.2: Xiriirka ka dhaxeeya shaqaalaha unuga iskuduwida iyo qoysasku waa mid wax ku ool ah wuxuuna taageerayaa meeleynta ilmaha ee xannaanada

Xeerka 1.3: Xiriirka ka dhaxeeya xannaaneeyayaasha iyo qoysasku waa mid hagaagsan oo taageera qoyska iyo ilmuhu inay la qabsadaan xannaanada

Xeerka 1.4: Xannaaneeyaha nafsadiisa iyo qorshayaasha qoyskiisu waxay siiyaan degaan wanaagsan oo taageera xannaana maalmeedka qoyska

Xeerka 1.5: Xiriirada xarunta gudaheeda waxay qiimeysaa kala duwanaanta, shaqo kooxeedka, xushmad isweydaarsiga, fahamka iyo aqoonyahimada

Asalka Tayada 2: Degaanka

Xeerka 2.1: Dibeda iyo gudaha guryaha xannaaneeyayaashu iyo goobaha kulamada ciyaartu* waa mid ku soo Dhaweynaysa, oo raaxo leh carruurtana u fiican

Xeerka 2.2: Dhammaan carruurtu waxay isticmaali karaan alaabo kala duwan oo xiiso leh iyo qalab

Xeerka 2.3: Tasiilaadka ay isticmaalaan unuga iskuxiridu waa kuwo ku soo dhaweynaya oo la isticmaali karo

Asalka Tayada 3: Khibradaha Carruurta, Barashada iyo Koritaanka

Xeerka 3.1: Xannaaneeyayaasha waxay ka jawaabaan baahida, xiisaha iyo awooda Carruurta oo dhan siyaalo taageeraya barashada degaanka guriga ah

Xeerka 3.2: Shaqaalaha unuga iskuduwidu waxay ku taageeraan barashada booqasho guri iyo/ama kulamo ciyaareed

Xeerka 3.3: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwidu waxay u hagaan dabeecada carruurta siyaalo wanaagsan

Xeerka 3.4: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwidu waxay kor u qaadaan waxqabadka iyo awooda bulshadeed ee carruurta oo dhan.

Xeerka 3.5: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwida waxay kor u qaadaan awooda jireed ee dhammaan carruurta

Xeerka 3.6: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwida waxay koriyaan afka dhammaan carruurta, wax qoristooda iyo wax akhriska, wax ogaalkooda, fekerkooda xisaabeed iyo sahaminta sayniseed

Xeerka 3.7: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha uga iskuduwidu waxay taageeraan horumarka hal abuurista carruurta oo dhan.

---

* Ujeedooyinka FDCQA, ereyga "kulanka ciyaarta" waxaa loo isticmaalaa inuu sharxo xaalada meesha ay laba (ama in ka badan) oo xannaaneeyayaal ahi isugu yimaadaan iyadoo carruurtoodu la socoto waayo aragnimada ciyaarta ilamaha xooga la saarayo. Kulamada ciyaarta waxaa laga yaabaa inay soo qaban qaabiyaan xannaaneeyayaasha laftigoodu ama shaqaalaha unuga iskuduwida.

Asalka Tayada 4: Caafimaadka, Nadaafada, Nafaqada, Ammaanka iyo Wanaaga

Xeerka 4.1: Jewiyada degaan ee carruurta lagu hayo waa ammaan

Xeerka 4.2: Cuntada iyo cabitaanku nafaqo ayey leeyihiin dhaqan ahaana waa ku haboon yihiin

Xeerka 4.3: Caafimaadka iyo ammaanka dhammaan carruurta waa la ilaaliliyey

Xeerka 4.4: Bedelaada Neebka,musqul geynta iyo u qubeyntuba waxay u tahay waayo aragnimo wanaagsan carruurta.

Xeerka 4.5: Baahida carruurta ee nasasho, hurdo iyo u raaxeyntaba waa la taageerayaa

Xeerka 4.6: Sharciga Gobolka ama Territoriga hadda ee khuseya ilaalinta ilmaha iyo wanaagooda waxaa loo dhaqan geliyaa si joogta ah

Asalka Tayada 5: Xannaaneeyayaasha iyo Shaqaalaha Unuga Iskuduwida

Xeerka 5.1: Shaqaala qorashada, xulida iyo habka wacyigelinta ee xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwuhu waxay dhiirigeliyaan qabashada iyo adeeg tayo leh

Xeerka 5.2: Qorshuhu wuxuu leeyahay nidaam ay kula socdaan wax qabadka jira oo ay ku ogaadaan meelaha looga baahan yahay hagaajin socota

Xeerka 5.3: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskduwaha iyo kuwa kale ee ku lugta leh maamulka

Xeerka 5.4: Qorshuhu wuxuu kor u qaadayaa ammaanka iyo caafimaadka mihnada

Asalka Tayada 6: Maamul iyo Maareeyn

Xeerka 6.1: Waxqabadka maamulku waa mid anshax leh oo ku shaqeeya sharciga khuseeya

Xeerka 6.2: Qorshahu wuxuu la tashadaa oo uu si wada jir ah ula shaqeeyaa dhammaan cidda ay khuseyso

Xeerka 6.3: Qorshuhu wuxuu u leeyahay hab anshax oo haboon oo sax ah oo loogutalagalay maamulida diwaanka

Xeerka 6.4: Qorshuhu wuxuu leeyahay hab sahlan oo cad oo lagu maamulo wixii cabashooyin iyo necitaan ah

Xeerka 6.5: Xannaaneeyayaasha iyo shaqaalaha unuga iskuduwida waa kuwo u adooda oo wax ku ool ah adeegooda ee bulshada dhexdeeda oo si firfircoon u raadinaya inay xiriir la yeeshaan wakaaladaha kale si ay uga faa'iideeyaan carruurta iyo qoysaskooda

Guddiga Dib u eegida Go'aamada Aqoonsiga (ADRC)

Guddiga Dib u eegida Go'aamada Aqoonsiga (Accreditation Decisions Review Committee) (ADRC) wuxuu masuul ka yahay dib u eegida go'aamada aqoonsiga ee ay sameyso NCAC. Xubnaha ADRC waxaa magacaaba Wasiirka Dawlada Dhexe ee masuulka ka ah xannaanada Carruurta. ADRC waxay wax u fulisaa si madax bannaan waxayna u gudbisaa talooyin NCAC.

Xaruntu waxay ka codsan kartaa ADRC inay dib u eegaan go'aankooda Aqoonsiga. Dib u eegideeda Go'aanka Aqoonsiga ee xarunta, ADRC waxay tixgelinaysaa macluumaadka qoran ee xarunta ka yimid oo sharxaya codsigeeda dib u eegida iyo dhammaan macluumaadka NCAC ay tixgelisay markii ay sameyneysay go'aankeedii ugu horeeyey ee aqoonsiga. NCAC waxay ku soo wargelineysaa xarunta qoraal go'aankeeda ugu danbeeya waxaana ku jiri doona nuqulka waxyaalihii ay ku talisay ADRC.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan ADRC iyo codsiga dib u eegida go'aanka aqoonsiga waxaad ka heleysaa adoo telefoon u diraya NCAC ama gelaya website ka NCAC ee ah www.ncac.gov.au.

Maalgelinta Lacagta Xannaanada carruurta iyo Ka qaybgalka lagu qanco iyo Horumarka FDCQA

Si aad baaqi ugu ahaato mid xaq u leh ogolaanshaha lacagta xannaanada Carruurta, xarumaha xannaano maalmeedka dheer waa inay raacaan *Child Care Benefit (Eligibility of Child Care Services for Approval and Continued Approval) waxka bedelida 2001(No.1)* ee laga hoos sameeyey nidaamka *Cashuuraha ee cusub (Family Assistance) ee Sharciga Maamulka 1999*.

Lacagta Xannaanada carruurta oo sii socota ee xarumaha xannaana maalmeedka dheer waxay ku lug leedahay raacitaanka xaruntu raacdo waxyaalaha ay FDCQA uga baahan tahay nidaamka 5 ta talaabo iyo go'aanka muujinaya inay sameeyaan heer lagu qanci karo oo xannaanada tayada carruurta ah, oo ay ku jirto horumarin joogta ah oo ah xagga heerka xannaanada iyadoo la raacayo meelaha Tayada iyo Xeerarka lagu sharxay *Quality Practices Guide* (2004).

Iyadoo la raacayo *Child Care Benefit (Breach of Conditions for Continued Approval) Amendment Determination 2001 (No.1),* NCAC da waxaa laga yaabaa inay war bixin ka geyso xarumaha ku guul dareysta inay raacaan , ama kuwa sameeya horumar lagu qanco iyagoo maraya FDCQA Wasaarada Dawlada Australia ee masuulka ka ah maamulka Lacagta Xannaanada carruurta.

Xoghaynta Wasaarada waxaa laga yaabaa inay ku soo rogto xayiraad xarunta ku guuldareysata fulinta waajibaadkeeda FDCQA. Xayiraadaas waxaa ku jiri kara joojinta wakhti gaaban ama kansilida ogolaanshaha Lacagta Xannaanada Carruurta (Child Care Benefit) . Adeegyada laga kansalo Lacagta Xannaanada carruurta ama laga joojiyo ilaa wakhti gaaban waxay sidoo kale luminayaan xaq u yeelashadooda kabitaanka Dhaqaale ee Caawimaada Hawl wadida (Operational Assistance).

Sharciga Liisan bixinta iyo FDCQA

Australia gudaheeda, Dawlad goboleed iyo Territory kastaa wuxuu masuul ka yahay sharciga liinsanka lagu siiyo xarumaha xannaano maalmeedka qoyska. Heerar Qaran oo loogu talagalay xannaano maalmeedka qoyska ayaa la sameeyey oo ay isku raaceen Dawlada Dhexe, iyo dawladaha Gobolka Territoryga 1997 waxaa sidoo kale isbedelo lagu sameeyey 1999. *National Standards for Family Day Care** waxaa loogu talagalay inay bixiyaan aasaaskii talaabo isku mid ah oo qaran ee liisan siinta xannaano maalmeedka qoyska.

Gobolada iyo Territoriyada dhexdooda ee leh sharciga liisan siinta ee xannaano maalmeedka qoyska, liisan siintu wuxuu siinayaa heer sharci ah oo aan xarun iyo xannaaneeyaba loo ogoleyn inay ku shaqeeyaan. Nooc ahaan waxaa ku jira qodobo marka horeba la yaqaan sida xaruntu inta ay leegtahay, qalabka yaal, tirada iyo da'aha carruurta, tirada shaqaalaha xarunta, tababarkooda carruurta ku saabsani inta uu leeg yahay. Qodobadan waxay *ka qayb qaataan (contribute)* tayada. FDCQA waxay ka amba qaadaa kuwan si ay u eegto qodobada *go'aamiya (determine)* tayada. Waxyaalaha ay xooga saareyso FDCQA tu waa waxqabadka xannaaneeyayaasha, shaqaalaha iyo natiijada dhabta ah ee carruurta. Waxay ka wareegtaa waxay xooga saareysay ee ah fulinta heerarka ugu yar oo ay u wareegtaa ka shaqeynta sidii loo gaari lahaa heerar sare oo xannaano.

Xaaladaha NCAC la wargeliyo arimo ku saabsan xagga liisanka ama ilaalada ilmaha ee xagga xarunta ka qayb qaadaneysa FDCQA, la hadlida haayadaha ku haboon ayaa dhici doonta. Horumarka xarunta ee NCAC waxay tixgelisaa in arimahan la xaliyo marka ay hesho talo ha'yada ku shaqada leh oo caddeynaysa in liisan bixinta ama arimaha ilaalada carruurta la xaliyo. Horumarka xarunta ee FDCQA waxaa laga yaabaa in la waxyeeleeyo haddii liinsan siinta ama arimaha ilaalinta carruurta aan la xalin.

---

* Gobolada iyo Territoriyada aysan ka jirin sharciga liisan bixinta ee xannano maalmeedka qoyska, *National Standards for Family Day Care* ayaa siinaya heerarka aasaasiga ah ee loogu talagay adeegyada si ay u dhaqan geliyaan si ay u hubiyaan ilaalinta iyo ammaanka carruurta ay hayaan. Fadlan tixraac Wasaarada Adeegyada Bulshada iyo Qoyska (FaCS) *Child Care Services Handbook* (oo laga heli karo websiteka Facs www.facs.gov.au/childcare)

FDCQA iyo Cabashooyinka ay hesho NCAC ee ku saabsan Xarunta Xannaano Maalmeedka Qoyska

Sidii doorkeeda oo kale, NCAC waxay maamushaa cabashooyinka ku saabsan xarumaha ka qayb qaadanaya FDCQA. NCAC waxay garowsanaysaa in cabashooyinka waxyaalaha la daneenayo badidooda si wanaagsan loola dhaqmo oo si toos ah loola xaliyo xarumaha. Xarumaha ka qayb qaadanaya FDCQA waxaa lagu dhiirigelinayaa inay sameeyaan oo ay si joogta ah u dhaqan geliyaan nidaam cad oo ay waxkaga qabtaan waxyaalaha dadku dareemayaan, waxyaalaha ay ka xun yihiin ama cabashooyinkaba. NCAC waxay dhiiri gelineysaa in cabashooyinka si looga wada hadlo waxyaalaha ay dareemayaan shaqaalaha xannaaneeyayaasha xarunta.

NCAC waxay wargelineysaa xarunta arimaha lagu soo qaaday cabashooyinka qoraalka ah. Marka la helo macluumaad ku saabsan xarun adeegeeda ee la xiriirta gobol/territory sharciyada liisan bixinta ama ilaalinta ilmaha, NCAC waxay wargelisaa haayada liisan bixinta ee Gobolka/Territory ga ama haayadaha kale ee arintani khuseyso.

Cabashooyinka ku saabsan xannaanada carruurta ee xarumaha waxaa loo arkayaa kuwo la xaliyey marka NCAC ay ku qanacdo in jawaabta xarunta ee la xiriirta arimaha laga cabanayo ay tahay mid ku filan iyo meeshii ku haboon, talo laga helo ha'yada ay khuseyso waxay cadeynaysaa in arimaha liisan bixinta ama ilaalinta ilmaha la xaliyey.

Horumarka xarunta ee FDCQA waxaa laga yaabaa inay waxyeeleyso haddii NCAC ay u aragto in arimaha la dareemayo ee cabashada aan la xalin.

Wax ku saabsan Golaha Aqoonsiga Xannaanada Carruurta ee Qaranka Inc (National Childcare Accreditation Council Inc) (NCAC)

Golaha Aqoonsiga Xannaanada Carruurta ee Qaranka (NCAC) waxaa la dhisay 1993 si uu u maamulo (Quality Improvement and Accreditation System) (QIAS) ee xarumaha xannaanada carruurta ee maalinta dheer ee Australia oo dhan. 2004 gudaheeda, NCAC waxay sidoo kale masuul ka noqotay maamulka Hubinta Nidaamka Tayada Xannaano Maalmeedka Qoyska ee (Family Day Care Quality Assurance) (FDCQA) ee xarumaha xannaano maalmeedka qoyska iyo Hubinta Tayada Xannaanada Saacadaha Dugsiga ka baxsan (Outside School Hours Care Quality Assurance) (OSHCQA) ee adeegyada xannaanada saacadaha dugsiga ka baxsan ee Australia. Ilaa iyo intii la sameeyey, NCAC waxay ka ciyaartay oo ay sii wadeysaa inay ka ciyaarto door hogaamin ah xagga horumarinta iyo qeexida tayada xannaanda carruurta. NCAC waxay ka heshaa maalgelin dawlada dhexe waxaana magacaaba guddoomiyaha iyo xubnaha NCAC wasiirka dawlada dhexe ee masuulka ka ah xannaanada carruurta. NCAC waa urur qaran xubnaheedana waxaa laga soo xulaa gubolo iyo terriroriyo badan iyo qaybaha ku jira mihnada xannaanada carruurta iyo mihnadaha la xiriira.

NCAC waxay ujeedadeedu tahay inay taageerto oo ay hagaajiso tayada xannaanada ee ay qabtaan adeegyada Carruurta ee Australia waxayna qasdeysaa inay ku caawiso kuwa qabta xannaanada carruurta iyo qoysaska talada ay u baahan yihiin si ay u caawiyaan hubinta in dhammaan carruurta Australia oo dhami helaan xannaano tayo sare leh.

Hawlaha NCAC waxaa ka mid ah aqoonsiga xarumaha xannaano maalmeedka Australiyanka ah ee ka qayb galaya FDCQA, adeegyada xannano ee saacadaha dugsiga ka baxsan ee Australiyanka ah ee ka qayb galaya OSHCQA iyo xarumaha xannaanada maalinta dheer ee ka qayb galaya QIAS; oo u sheegayada Dawlada dhexe ka qaybgalka iyo horumarka xarumaha xannaano maalmeedka qoyska ee FDCQA, adeegyada OSHCQA iyo xarumaha ku jira QIAS.

Ujeedooyinka NCAC iyo waxyaalaha ay goosatay inay u qabato macaamiisheeda waxay ku qoran yihiin heerkeeda qoraalka ah ee Adeega Macaamiisha *Customer Service Charter* ee laga heli karo adoo teleefan u soo diraya NCAC ama gelaya website ka NCAC da ee ah www.ncac.gov.au

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan heerarka iyo tilmaamayaasha tayada FDCQA ee looga baahan yahay aqoonsiga, fadlan eeg FDCQA *Quality Practices Guide* (2004) ama gal website ka NCAC: www.ncac.gov.au

Buuga Tilmaan bixiyaha ah ee FDCQA(2004), FDCQA *Quality Practices Guide* (2001) iyo FDCQA *Handbook* (2004) iyo FDCQA *Self-study Report* (2004) iyo FDCQA *Validation Report* (2004) waxaa laga iibsan karaa NCAC.